# TRONDHEIM KOMMUNE



Somali

## XEERARKA GURYAHA u yaal guryaha degmada laga ijaarto

Dhammaan dadka deggan guri ay degmadu kiraysay waa inay gacan ka geystaan deegaan wanaagsan oo ammaan leh, kana hortagaan in dhaawac soo gaaro guryaha. Adaa mas'uul ka ah naftaada iyo dadka martida kuu ahba.

**1. Xasilooni guud iyo ammaan**

a. Guriga gudihiisa iyo dibediisuba ha xasiloonaadaan saacadaha 23.00 ilaa 07.00
b. Teeda kale deriskaaga xaq dhawr afar iyo labaatanka saac.
c. Mar walba qafil iridda weyn ee dibedda, iridda dabaqa godka iyo iridda dabaqa oogada.

**2. Guriga**

a. Gurigu ha ahaado nadiif habbaysan. Isla markiiba soo sheeg dhaawaca guriga gaara ama cayayaan ku dhasha.
b. Si looga hortago huur iyo caaryo madaw guriga si joogto ah u haawi, sanadka oo dhan ha furnaadaan hawo saarayaashu. Fur marwaxada jikada kolkaad cunto karinaysid.
c. Sida qaalibka ah lama ogola in dibadda lagu xiro anteenooyin.
d. Balkoonka ha ku hurgufin kadiifado hana ka laadlaadin alaab.
e. Lama ogola in shinbiraha laga quudiyo guriga.
f. Danabaynta baabuurka korontada ah/kan isugu jira shidaal iyo koronto/baaskiilka baa- teriga ah waxaa laga ogolyahay oo keliya sanduuqa danabaynta/danabeeye la qiray.
g. Lama ogola isticmaalka dab holcaya (hilib-dube/shoolad/oog/iyo wixii la mida, iyo kulay- liye gaas ku shaqeeya.
h. Ugu yaraan hal mar sanadka bedel baateriga dab-sheegaha oo foorari dabdemiyaha.
i. Guriga, barandada ama aagga la wadaago ha dhigan alaabta dabka u nugul ama qarxa.

**3. Aagagga la wadaago**

a. Alaabtaada dhigo aqalkaaga ama bakhaarka oo keliya.
b. Gaadiid aan diiwaan gashanayn ha dhigan mulkiyad ay degmadu leedahay.
c. Ku dhaqan xeerarka degmada ee quseeya qashin kala sooca. Qashin ama alaabtaada ha dhinac/hor dhigin konteenarada. Alaabtaada waaweyn waa in adigu aad geysid meelaha qashingeynta.
d. Lama ogola inaad birifaati ahaan u isticmaashid bareesooyinka aagagga la waadago.

**4. Haysashada xawayaanka**

a. Sida qaalibka ah waa la ogolyahay haysashada xayawaanka. Waa inaad guriga u fasax- did mulkiilaha si uu u fuliyo guri booqashada loo baahdo, kormeer iyo dayactir waxaana kugu waajibay inaad u digtid mulkiilaha haddii aad guriga ku haysatid xayawaan rabaa- yad ah kolka la fulinayo guri booqashada. Amarka mulkiilaha ka dib waxaa waajib kugu ah inaad si ku meelgaar ah u rartid ama aad xayawaanka rabaayada ahi ka qabatid si aanu u xanibin, u cabsiin ama u dhaawicin qofka fulinaya guri booqashada.
b. Haysashada xayawaanka guud ahaan lagama ogola guriga dad u adeegisi ka jirto.
c. Waa in aanay dhicin in ilaalin la'aan uu xayawaanka rabaayadda ahi marmaro aagga la wadaago iyo iridaha hortooda.

**5. Jebinta xeerarka guryaha**

a. Haddii la jebiyo xeerarka guryaha waxaa la jebiyey heshiiska ijaarka guriga waxaana ka dhalanaya natiijooyin aan fiicnayn. Adaa dhaqaale ahaan mas'uul ka ah kharshayada aad u soo jiiddo degamada Trondheim, waxaadna khatar ugu jirtaa in laga baxo heshiiska ijaarka aqalka iyo inaad hoyga weydid.
b. Looma dulqaadanayo dirir ama hanjabaad lagula kaco shaqaale, deris ama cid kale.
c. Haddii gurigu uu qayb ka yahay shirkad-guri ama wada-laahansho, waa inaad iyagana xeerarkooda ku dhaqantid.

**6. Ka cabashada xaaladda hoyga**

a. Haddii uu deriskaagu jebiyo xeerarka ama uu dhibaato suubiyo, cabasho qoraal ah u dir degmada. Waxaad adeegsan kartaa foomka ku jira "Klage på bomiljø", ama ii-meyl u dir bomiljo@trondheim.kommune.no ama warqad soo dir.

Xafiiska taleefanada degmada Trondheim: 72 54 00 00 Dib loo eegay: 01.10.2024